



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad**

**Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa: 12-aad**

**Tr:21.05.2016**

---

**Kalfadhiga 8-aad**

**Kulankiisa:12-aad, sacada furitaanka. 1:10 gh, sacada xiritanka.1:20 gd.**

**Guntinta: 197 xildhibaan.**

**Ajendaha:-**

**1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**

**2.Ansixinta Ajendaha**

**3.Qaybinta Akhrinta iyo Ansixinta Sharciga Suurta gelinta Doorashada Dadban ee 2016.**

**Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.**

1.waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu  
akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu xildhibaanada uu u soo jeediyay in ay ansixiyan  
ajendaha xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha.

**Guddoomiyaha Golaha Shacabka,wuxuu xildhibaanada uu u soo jeediyay, arrintan waa xasaasi  
in aan ku deg degno mahan, waa in aan aad ugu fiirsanaa waxaa nala jooga qoladii talada nala  
wadaagay si aan u gaarno arrin aan isku waafaqsanahay,waxay iga codsaden in shirka dib loo  
dhigo mudo laba maalmood ah, madama ay tahay arrin xasaasi ah oo masiir ah,haddaad igu  
raacdan oo aad ogolaatan.**

Intaa ka dib Xildhibaanada wey ogolaadeen dib u dhigista shirka.

**Kalfadhiga 8-aad Kulankiisa:12-aad uu shir Guddoominayay,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:20 gd.**